

Macluumaadka Qorshaha Shakhsi ee Xaaladda Degdegga ah Personal Emergency Plan Information

U isticmaal foomka si aad u sameyso qorshe haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. La dhammeystir qorshaha qoys, saaxiibo, iyo daryeelayaal si aad u go'aamiso sida aad midba midka kale isu la xiriiraysaan, halka aad ku kulmaysaan, iyo waxa aad sameynaysaan xaaladda degdegga ah. **Ku hayso nuqulka qorshahan xirmada sahayda xaaladda degdegga ah ama meel kale oo ammaan ah oo aad ka heli karto haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.** Ha u celinin foomkan maamulaha kiiskaaga.

Macluumaadka Xiriirka Shaqsi				
MAGACAAGA		LAMBARKA TELEFOONKA		CINWAAN IIMAYL
CINWAANKA WADDADA			ISGOYSKA UGU DHOW	
Macluumaadka Xiriirka Xaaladda Degdegga ah				
Magaca, telefoon lambar, iyo cinwaanka iimayl ee dadka ay tahay in lala xiriiro haddii ay xaalad degdeg ah dhacdo.				
MAGACA XIRIIRKA DEGAANKA		XIRIIRKA		
LAMBARKA TELEFOONKA	LAMBARKA TELEFOONKA GACANTA		CINWAAN IIMAYL	
MAGACA XIRIIRKA DEGAANKA		XIRIIRKA		
LAMBARKA TELEFOONKA	LAMBARKA TELEFOONKA GACANTA		CINWAAN IIMAYL	
MAGACA XIRIIRKA BANNAANKA MAGAALADA		XIRIIRKA		
LAMBARKA TELEFOONKA	LAMBARKA TELEFOONKA GACANTA		CINWAAN IIMAYL	
Marka ay dhacdo xaalad degdeg ah, kumaa eegaya haddii aad fiican tahay?				
MAGACA	XIRIIRKA	LAMBARKA TELEFOONKA	CINWAAN IIMAYL	
MAGACA	XIRIIRKA	LAMBARKA TELEFOONKA	CINWAAN IIMAYL	
Goobaha Kulanka ee Xaaladda Degdegga ah				
Goobaha aad kula kulmi doonto qoyska, saaxiibada, iyo daryeelayaasha ee xaaladda degdegga ah.				
GOOBAHA LAGU QAXO			LAMBARKA TELEFOONKA	
GOOBTA KULANKA EE XAALADDA			LAMBARKA TELEFOONKA	
GOOBTA KULANKA EE GOBOLKA			LAMBARKA TELEFOONKA	
Macluumaadka Xiriirka Caafimaadka ee Muhiimka ah				
TAKHTARKA AASAASIGA AH	LAMBARKA TELEFOONKA	MAGACA DAAWADA	QIYAASTA DAAWADA	INTA JEER
FARMASHIILAHA	LAMBARKA TELEFOONKA			
Qalabka caafimaadka ee aad ugu baahan karto xaaladda degdegga ah:				
Waa maxay waxa ay tahay in dadku ay kaa ogaadaan adiga ama gurigaaga haddii ay u yimaadaan in ay kugu caawiyaan xaaladda degdegga ah?				

Talooyinka Qorshaynta Xaaladda Degdegga ah

Diyaar Noqo

Dadka sameysta qorshe loogu talagalay xaaladaha degdegga ah waxaa ay kordhiyaan fursadda ay ku badbaadaan ilaa gargaar uu ugu yimaado.

Inta lagu guda jiro xaalad degdeg ah waxaa ay kuu sheegi karaan saraakiisha degaanka iyo kuwa gobolka in aad guriga joogtid. Qof kasta waa in uu diyaar u noqdo in uu isku daryeelo guriga ugu yaraan saddex maalmood. Gurigaaga waxaa uu noqon karaa hoygaaga keliya ilaa gargaar uu kaaga yimaado. Liisto-hubineedka waxaa uu kugu caawin karaa in aad isku diyaariso xaalad degdeg ah.

Dhageyso wararka cusub ee ka imaanaya saraakiisha ee ku saabsan haddii ay tahay in aad guriga joogtid ama baxdid. Raadiye beteri ku shaqeyna waa habka ugu fiican ee warar cusub loogu helayo saraakiisha maadaama adeegyada korontada iyo telefoonka laga yaabo in aysan shaqeyn.

Ha u maleyn in gargaar uu kuu imaan doono. Samee qorshaha shakhsi ee xaaladda degdegga ah Haddii aad u baahan doonto taageero inta lagu guda jiro xaalad degdeg ah, ku dar dadka ku caawinaya qorshahaaga. Si joogto ah ula eeg si aad u hubiso in weli la heli karo si ay kuugu caawiyaan xaaladda degdegga ah.

Hubso in qorshahaaga la cusboonaysiiyo iyo in sahaydaada xaaladda degdegga ah aysan dhicin.

Barnaamijyada Gargaarka

Barnaamijyada gargaarka gaarka ah ayaad heli kartaa marka ay kugu dhacdo xaalad degdeg ah. Weydii waaxda dabke ee degaankaaga, waaxda booliska, iyo xafiiska maareynta xaaladda degdegga ah haddii ay bixiyaan barnaamijyada noocaas ah. Iska diiwaangeli shikradda korontada degaanka haddii aad ugu tiirsan tahay korontada qalab caafimaad.

U diyaargarow noocyada kala duwan ee xaaladaha degdegga ah

Marka aad sameynayso qorshahaaga, tixgeli noocyada kala duwan ee xaaladaha degdegga ah, sida dabka, dhul-gariirka, duufaanta, ama sunaami. Diyaari xirmada sahayda xaaladda degdegga ah ee leh sahay ku filan iyo qorshe xaalad degdeg ah ee leh taageero ku filan.

Sahayda Degdegga ah

Tixgeli in aad ku kaydiso agabkan soo socda meel aad si fudud uga soo heli kartid inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah:

- Raadiye beteri ku shaqeyna iyo beteriyo dheeraad ah
- Agabka nadaafadda shakhsiga
- Telefoon aan u baahnayn koronto
- Aalad baaq bixinaysa sida firimbi iyo muraayad
- Cunto: Sahay ku filan qof kasta 3 maalmood oo baakadaysan oo ay sahlan tahay in la sameeyo.
- Makiinadda cunto karinta xerooyinka ama cunto dubashada iyo xaanshida almuuniyamta ee culus
- Saacado aan biyo galin, shumac, iyo shidaal/gaar wax lagu karsado
- Toosh iyo beteriyo dheeraad ah
- Bac lagu seexdo iyo bustooyin dheeraad ah
- Agab raaxo
- Qalab gasacyada lagu furo
- Sahayda laba toddobaad ee daawooyinka aad qaadata
- Saxano waraaq ah iyo maacuun caag ah
- Nuqullada waraaqo muhiim ah (macluumaadka caymiska, Aqoonsi iwm.)
- Qalab ujeedo badan leh
- Xirmada gargaarka degdegga ah
- Lacag kaash ah (sarif iyo biilasha yaryar)
- Cuntooyin gaar ah
- Biyo: 1 galloon qof kasta ee maalin kasta ugu yaraan 3 maalmood
- Cunto iyo biyo loogu talagalay xoolaha iyo xayawaanka rabaayadda kuu ah
- Dhar dheeraad ah oo aad isaga beddesho, gacmo-gashi, iyo kabo adkaysi leh
- Alaabay, buugaag, halxiraalayaal, ciyaaro
- Sahay caafimaad